

Natijada Healthy Kids (Carruur Caafimaad Qabta Minnesota)

Ka Hortagaha Oolka ee Organophosphorus

Shayada ka hortagaha oolka ayaa ah kiimikooyin lagu daray noocyo badan oo alaabada ah si ay ugu adkeeyaan in shayga uu dab qabsado. Shayada ka hortagaha oolka ee Organophosphorus flame retardants (OPFRs) waa hal nooc oo ka hortagaha oolka ah. Isticmaalkooda oo baahsan awgeed, OPFRs waxaa caadi ahaan laga helaa gudaha iyo dibada guryaha.

Saynis yahanadu waxay wali daraaseynayaan sida shayada ka hortagaha oolku ay u saameeyaan caafimaadka dadka. Qaarkood ayaa waxaa laga yaabaa inay farageliyaan hormoonnada dabiiciga ah ee jirka, kuwaas oo saamayn kara korriinka dhallaanka iyo carruurta. Qaarkood ayaa laga yaabaa inay waxyeleeyaan habdhiska neerfaha, habka taranka, ama in ay keenaan kansar. Si kastaba ha ahaatee, **in laga helo OPFRs kaadida carruurta ayaa ah wax caadi ah oo macnaheedu maaha in caafimaadkooda ay saamayn doonto.**



Wixii macluumaad dheeraad ah iyo khayraad ah, fadlan booqo boggeena internetka: [Healthy Kids Minnesota: Macluumaadka Kiimikada iyo Khayraadka.](#)

Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee loo isticmaalo

- OPFRs waxaa lagu daraa alaabada sida alaabta guriga, joodariyaasha, roogaga, dahaarka marada ah ee fadhiyada, elektirooniga, iyo buushka dahaadhka dhismaha si loo yareeyo in ay ololi karaan.
- Alaabta carruurta ayaa waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan OPFRs qaarkood. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah kuraasta ilmaha ee baabuurta iyo alaabta caruurta ku ciyaarto ee laga sameeyay buushka urethane sida blocks iyo gogosha ciyaarta.
- Laga soo bilaabo 2019, sharciga Minnesota waxa uu xaddiday OPFRs qaarkood ee ku jirta alaabta carruurta, joodariyaasha, iyo alaabta guriga ee dahaadhka marada ah leh.

Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee carruurta ay ku soo gaari karaan?

- OPFRs waxay si tartiib tartiib ah uga soo baxaan alaabta oo ay u soo galaan hawada iyo dhaska gudaha guryaha iyo baabuurta.
- Carruurta waxay ku soo karaan neefsashada hawada iyo dhaska, liqidda dhaska/boorka marka ay gacmahooda ama shayada gashadaan afka, ama taabashadooda tooska ah ee alaabta.
- Carruurta way gurguurtaan oo waxay jecel yihiin inay dhulka ku ciyaaraan, taasoo la micno ah inay in badan soo gaari karto dhasku/boorku.

Sida aad hoos ugu dhigi karto in ay ku soo gaarto ka hortagaha ololku

- Si joogto ah u nadiifi sagxadaha iyo meelaha dushooda ee gurigaaga si aad uga ilaaliso in boodhku uu ku ururo.
- Ilmahaagu gacmihiisa ha dhaqo ka hor inta uuna wax cunin.
- Beddel alaabta guriga ee dahaadhka marada ah ee jeexmay ama leh buushka kala daatay.
- Tixgeli in aad iska bedesho alaabta duugga ah ee carruurta ee ay ku jirto buushka urethane. Alaabooyinka qadiimka ah waxay aad ugu dhow yihiin inay ku jiraan shayada ka hortagaha ololka ee la mamnuucay.
- Alaabta guriga ayaa laga yaabaa inay leeyihiin calaamad ku lifaaqan oo tilmaamaysa in galkooda ay ku jirto kiimikooyinka ka hortagaha ololka oo lagu daray (laakiin aan sheegayn kuwa ay yihiin). Shayada kale, waxaad la xiriiri kartaa shirkadda si aad u weydiiso wax ku saabsan shayada ka hortagaha ololka ee lagu daray.

Shayaha ka hortagaha ololka ee laga baaray kaadida ilmahaaga

OPFRs ayaa waxay isu beddelaan kiimikooyin xiriir la leh marka ay jirka ku jiraan. Waxaan ugu yeerna kuwan “waxyaabaha qurubyada ah/burburka ah”(breakdown products). Healthy Kids Minnesota waxay cabbirtay waxyaabaha qurubyada OPFRs ee ku jirta kaadida ilmahaaga. Shayada ka hortagaha ololka iyo waxyaabaha qurubyada ah ayaa waxay leeyihiin magacyo kiimiko oo dheer, sidaa darteed magacyadooda oo la soo gaabiyey ayaanu u isticmaalaynaa xaashidan iyo shaxda natiijada ilmahaaga.

SHAYADA QURUBYADA OPFR EE LA BAARAY	IYO OPFR EE AY ASALKA AHAAN KA YIMAADDEEN
BCETP	TCEP
BDCPP	TDCPP
DPHP	TPHP and EHDPHP
BCPP	TCPP
DBuP	TBP
DBZP	TBzP
DCP	TCP
tBPPP	tBTPP
iPPPP	4tBPDPP
TBBA	EH-TBB



Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan magacyada kiimikooyinka oo dhammaystiran, fadlan booqo boggeena internetka: [Healthy Kids Minnesota: Sharaxaada Natiijooyinkas.](https://www.health.state.mn.us/healthykids/)

Waxda Caafimaadka ee Minnesota
Minnesota Department of Health
Barnaamijka Baaritaanka Kiimikooyinka
ku jira jirka Biomonitoring Program

625 Robert St N
PO BOX 64975
St. Paul, MN 55155-2538

health.biomonitoring@state.mn.us
www.health.state.mn.us
Si aad macluumaadkan ugu hesho
qaab kale, email u soo dir
health.biomonitoring@state.mn.us